Puget Sound Regional Council

Guddiga Latalinta Sinnaanta (EAC)
Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo

Waa maxay PSRC?
Puget Sound Regional Council (PSRC) waa hay'ad dadweyne oo ka hawlgasha arrimaha ka tallawsan xuduudaha magaalada iyo degmada ee Degmada King, Kitsap, Pierce, iyo Snohomish. Kuwan waxa kamid ah gudbinta iyo socdaalka, isbedelka cimilada, guriyeynta, iyo qorshaynta dadweynaha cusub iyo korinta shaqada. PSRC ma laha awood cashuureed ama socodsiin barnaamijeed, balse hay'addu waxa ay qaabaysaa gaadiidka, horumrinta dhaqaalaha, iyo qorshaynta koboca. PSRC sidoo kale waxa ay qaybisaa lacagaha gaadiidka ee federaalka iyada oo ku salaynaysa hannaan codsi heer gobol ah. Taas waxa dheer, PSRC waxa ay bixisaa xog si ay u caawiso dawladaha hoose iyo dadweynaha, waxa ay samaysaa hagitaan iyo cilmibaadhis si ay warbixin u siiso go'aanada, waxana ay raacdaa qorshayaal muddooyinkoodu gaadhayo 20 ka ama 30 ka sano ee soo socda. Guddiyada PSRC waxa ay ka kooban yihiin madax la doortay, waxaana loo xilsaaray inay matalaan dhammaan dawladaha hoose ee gobolka. Rasmi ahaan, hay'addu waa Hay'ad Qorshayn Magaaleed iyo Hay'ad Qorshayn Gaadiid Gobol. PSRC waxa kharashka laga siiyaa maalgelinta federaalka iyo gobolka iyo fiiyada xubinimada ee laga helo magaalooyinka, degmooyinka, iyo hay'adaha dadweyne ee kale.

Maxay qabtaan Guddiga Latalinta Sinnaantu (EAC)?
EAC waa koox shaqeed oo ka kooban dad degaan ah iyo sidoo kale hay'ado dawladeed iyo kuwo bulsheed oo kamid ah gobolka Puget Sound oo metelaya bulshooyinka Madawga ah, Kuwa Dhulka loogu Yimi, iyo dadka aan caddaanka ahayn (BIPOC) iyo kooxaha kale ee la faquuqo. EAC waxa ay la abuurtaa agabyada (sida agabka xogta iyo khayraadka qorshaynta) iyada oo kaashanaysa shaqaalaha iyo Guddiga Fulinta. EAC sidoo kale waxa ay ka la talisaa guddiyada iyo lajnadaha PSRC siyaasadaha iyo barnaamijyada iyada oo aragtiyo sinnaan lagu eegayo.

Waa maxay sababta PSRC u samaysay Guddiga Latalinta Sinnaanta?
Gobolku waxa uu noqonayaa mid si korodh leh u noqonaya mid dadkiisu kala duwan yihiin. Si walba ha noqotee, hoggaamiyeyaasha la doortay kuwaas oo ka hawlgala guddiyada / lajnadaha PSRC iyo shaqaalaha matala hay'addu imika ahaan kama turjumaan kala duwanaanshaha gobolkan. Sababtaas awgeedna, sida hay'ado kale oo badan, PSRC waxa ay leedahay meelo aan laga warqabin oo keeni karta faquuqid joogto ah oo lagu hayo bulshooyinka Madawga ah, Dhulka loogu Yimi, iyo dadka aan caddaanka ahayn (BIPOC) iyo cawaaqib aan loo meel deyin oo soo kordhin karta dhibaato dheeraad ah. Guddigani waxa ay abuuraan aag ay bulshadu u adeegsan karto inay kala shaqayn karto shaqaalaha PSRC iyo madaxda la doortay ee caasimadaha, magaalooyinka, degmooyinka, Qabaa'ilka iyo hay'adaha kale ee ka jira gobolka si

ay meesha uga saari lahaayeen caqabadaha, iyo in laga faa'iidaysto hibada ku jirta bulshooyinka BIPOC iyo kooxaha kale ee la faquuqo, isla markaana loo horumarin lahaa tayada nolosha gobolka ee guud.

Waa maxay sababta uu qof uga hawlgelayo Guddiga Latalinta Sinnaanta?
Shaqooyinka muhiimka ah ee PSRC waxa kamid ah:

- Bixinta hoggaamin goboleed si ay diiradda u saaraan arrimaha muhiimka ah
- Samaynta siyaasado iyo talooyin haga go'aanada maxalliga ah
- Qaybinta maalgelinta gaadiidka ee federaalka

Xubnaha guddigu waxa ay fursad u heli doonaan inay adeegsadaan khibradaha ay ka helaan khibraddoodii nololeed iyo/ama shaqadooda / taariikhdooda akaadeemiyadeed si ay ugu wargeliyaan shaqooyinkan muhiimka ah oo ay ugu horumariyaan natiijooyinka bulshadooda. Xubnaha guddigu waxa ay kala shaqayn doonaan shaqaalaha PSRC iyo hoggaanka la doortay gacan ka geysashada hubinta deegaan loo dhan yahay halkaas oo sinnaanta qowmiyadeed la qiimeeyo oo la saraysiiyo. Xubbinimada guddigu waxa ay bixisaa fursad ah koboc shakhsiyeed iyo xirfadeed, maadaama xubnuhu wax dheeraad ah ka baranayaan dawladaha goboleed iyo kuwa hoose iyo doorka qorshaynta goboleed ee horumarinta sinnaanta qowmiyadeed ee dhammaan heerarka dawladda hoose.

Waa maxay shuruudda ka hawlgelidda Guddiga Latalinta Sinnaanta?
Codsadeyaashu waa inay degan yihiin iyo/ama ka shaqeeyaan degmooyinka King, Kitsap, Pierce, ama Snohomish. Diirad saarid ayaa la sameyn doonaa si loo doorto xubnaha ka socda bulshooyinka ee aan badanaa lagaga fekerin go'aan-qaadashada PSRC, kuwaas oo ay ka mid yihiin bulshooyinka Madawga ah, Dhulka loogu Yimi, iyo dadka aan caddaanka ahayn (BIPOC), dadka degaanka ah ee dakhliga hooseeya, dadka naafada ah iyo dhallinyarta.

Waa maxay hannaanka codsigu?
Codsiga ku soo gudbi onlayn ahaan ama kala xidhiidh Charles Patton, Maareeyaha Sinnaanta, barta CPatton@psrc.org ama 206-971-3285.

Isbeddelo ma lagu sameyn karaa arji kadib marka lasoo gudbiyo?
Haa, haddii codsade jeclaan lahaa in uu isbeddelo sameeyo kahor wakhtiga kama dambaysta ah (Sibtambar 18keeda), fadlan kala xidhiidh Charles barta CPatton@psrc.org ama 206-971-3285

Waa maxay jadwal wakhtiyeedka loogu talagalay hannaanka ballanta Guddiga Latalinta Sinnaanta?
Codsiyadu waxa ay ku eeg yihiin Sibtambar 18keeda. PSRC waxa ay dib u eegi doontaa codsiyada, waxa ay muddeyn doontaa waraysiyada, waxaana ay magacaabi doontaa xubnaha ugu dambeyn Diisambar 7deeda.

Yaa qabta ballamaha guddida?
Guddiga Latalinta Sinnaanta ee hadda waxa ay kala shaqayn doonaan shaqaalaha PSRC iyo guddiga fulinta (madaxda wadaaga ah ee ka hawlgala guddi PSRC oo kasta) dib u eegista codsiyada, qabashada waraysiyada, iyo u gudbinta musharixiinta Guddida Fullinta ee PSRC. Guddida Fulinta ayaa si rasmi ah u magacaabi doona xubnaha guddida.

PSRC ma aqbashaa cidda loo sharraxay Guddida Latalinta Sinnaanta?
PSRC waxa ay dhiirrigelinaysaa in fursaddan lala wadaago kooxaha iyo dadka degaanka ah ee bulshada ee daneynaya. Soo jeedinada wacyigelinta guddida waa in lagu la wadaago Charles barta CPatton@psrc.org ama 206-971-3285.

Codsi ma la gudbin karaa iyada oo wakiil laga yahay qofkale?
Maya, codsiyada looma soo gudbin karo qofkale. PSRC waxa ay dhiirrigelinaysaa fursaddan in lala wadaago xubnaha bulshada. Haddii qof degaan ah oo daneynayaa kaalmo uga baahdo dhamaystirka codsiga, fadlan Charles kala xidhiidh CPatton@psrc.org ama 206-971-3285.

Sidee bay xubnaha guddidu ugu lug yeelan karaan Guddiga Latalinta Sinnaanta?
EAC waa guddi la talin oo uu leeyahay Guddida Fulintu (oo ay kamid yihiin Guddida Hawlgallada) iyo Guddiyada Maareynta Koboca iyo Siyaasadda Gaadiidka. Guddiyadan PSRC waxa ay ka codsan karaan EAC inay ka fekerto go'aanada kahor inta aanay tallaabo qaadin. Xubnaha guddida PSRC sidoo kale waxa loo ogol yahay inay u kuurgalaan kulannada EAC. Haddii aad daneynayso, fadlan ka raadi linkiga kulanka soo socda ajendaha EAC.

Sidee bay codsadeyaasha aan loo dooran inay ka hawlgalaan Guddida Latalinta Sinnaanta uga qaybqaadan karaan shaqadan?
PSRC waxa ay ku dhiirrigelisaa kuwa aan loo dooran inay ka hawlgalaan guddida inay isdiiwaangeliyaan liiska dhinacyada daneynaya ee EAC si ay u helaan ajendeyaasha kulanka iyo wacaasha kale ee kasoo korodha guddida. Kulannada guddidu waxa ay u furan yihiin dadweynaha, markaa dhinacyada daneynaya waa loo ogol yahay inay soo xaadiraan. Marka ay shaqada guddidu bilaabanto, guddi hoosaadyo ayaa sidoo kale sameysmi kara. Tani waxa ay fursad u tahay xubnaha aan guddida ku jirin inay ku lug yeeshaan.

Imisa jeer ayaa Guddida Latalinta Sinnaanta ay kulmaan?
EAC waxa ay kulmaan galabta Khamiista ee ugu horaysa bisha laga bilaabo 5:30g.d illaa 7:30g.d. Kulannada waa ay joojin kartaa, ama kulanno dheeraad ah ayaa ay muddeyn kartaa, EAC hadba sida loogu baahdo.

Waa maxay wakhtiga u go'an in laga hawlgalo Guddida Latalinta Sinnaanta?
Kulannada guddidu waxa ay caadi ahaan u dhici doonaan qaab bille ah waxaana ay qaadan doonaan muddo ah 2 saacadood, taas oo ku xidhan macluumaadka lagaga wada hadlayo kulanka. Xubnaha guddidu waa inay filaan inay ku qaataan dib u eegista macluumaadka 1-2 saacodood kahor kulanka.

Miyaa Guddida Latalinta Sinnaantu u kulmaan si onlayn ah ama si fool ka fool ah?
Imika ahaan, dhammaan kullanada EAC waa kuwo onlayn ah. Si walba ha noqotee, mustaqbalka waxa dhici karta inaynu sahamino qaab isku dhaf ah oo xubnuhu ay usoo xaadiri karaan fool ka fool ama onlayn iyada oo lagu salaynayo baahiyahooda. Xubnaha doorbidi kara inay kulanka ku qaataan fool ka fool, PSRC waxa ay dooran doontaa goobo kulan oo kala duwan oo ku kala yaalla degmooyinka King, Kitsap, Pierce, iyo Snohomish si ay u daboosho baahiyaha xubnaha guddida. Iyada oo ku xidhan xaddiga shaqo ee EAC, kulannada billaha ah waa la joojin karaa ama kulano dheeraad ah ayaa lasoo kordhin karaa.

Ma daruuri/waajib baa in lasoo xaadiro kulan guddi oo kasta?
Haa, xubnaha guddida waxa laga filayaa inay soo xaadiraan oo ay si firfircoon uga qaybqaataan kulannada. PSRC waxa ay dalbanaysaa in hore loo sii ogaysiiyo haddii xubin aanay soo xaadiri karin.

Muddo intee le'eg ayaa codsadeyaashu ka hawlgali doonaan Guddida Latalinta Sinnaanta?
Xubnuhu waxa ay hawlgeli doonaan muddo laba-sano ah iyada oo fursad loo siin doono inay dib usoo codsadaan.

Ma jirtaa fii looga hawlgeli doono Guddida Latalinta Sinnaanta mise xubnaha ayaa kharash lagu siin doonaa shaqada guddida?
Ma jirto wax fii ah oo looga hawlgalayo EAC. Xubnaha guddiyada PSRC ee aanay hore magdhaw uga siin loo shaqeeyeyaashoodu ama hay'adaha kale ka qaybqaadashada kulannada PSRC waxa magdhaw ahaan loo siiyaa $125 kulankiiba. Kani waa xaddi aan isbedbedelin oo loogu talagalay in lagu daboolo kharashka wakhtiga loogu diyaargaroobayo kulan kasta iyo sidoo kale kharashaadka kale ee sida daryeelka ilmaha, cuntada, iyo socdaalka.